

# Markaad u imanaysid isbitaalka foosha

## When to Come to Hospital in Labour

Somali

July 2022

Fadlan la xiriir Adeega Dhalmada ama umulisadaada ka hor intaadan guriga ka soo bixin. Umulisada ayaa kuu sheegi doonta waxaad sameynaysid oo ka jawaabi doonta wixii su'aala ah.

### **Haddii aad fileysid ilmahaagii koowaad**

Haddii aad ku dhowdahay wakhtigii dhalmada ( 37 toddobaad ama ka badan), waa inaad isbitaalka timaadaa:

- Markaad leedahay xannuunka dhalmada oo joogta ah soona xoogeysanaya, iskuna dhow dhow oo qaadanaya ilaa 60 ilbiriqsi, bilow ilaa dhammaad. Qabqabashada dhalmo waa inay sidaan ahayd ugu yaraan hal saac. Xannuunka foosha wuxuu qiyaastii noqonayaa saddex ilaa shan daqiiqo mid ay u dhaxeeyso dumarka badidooda.

### **AMA**

- Marka 'biyahaagu dilaacaan'. Tani waa marka boorsada biyaha ee ku wareegsan ilmaha ay dilaacdo. Waxaa laga yaabaa inaad aragto dhibco yar ama dareere si lama filaan ah u soo daata. Marka biyahaagu ay dilaacaan waa fikrad wanaagsan inaad xirato suufka nadaafada. Umulisadaada ayaa jeegareyn doonta midabka iyo urta dareeraha markaad isbitaalka timaadid.

### **AMA**

- Haddii aad leedahay wax dhiigitaan cas oo dhalaalaya.

Haddii aad fileysid ilmahaagii koowaad oo uurkaagu uu ka yar yahay 37 toddobaad waa inaad la soo xiriirtaa isbitaalka haddii aad leedahay wax calaamado fool ah, sida xannuunka foosha, biyaha oo dilaaca ama dhiigis.

### **Haddii aad hadda ka hor dhashay**

Waa inaad raacdaa tallada kore ka sokow waa inaad isbitaalka timaadaa marka xannuunka fooshu uu isu jirsado shan ilaa toddobo daqiiqo.

### **Ka waran haddii aan u baahan ahay in Ingiriiska layga caawiyo?**

Turjumaano xirfada leh ayaa la helayaa haddii aad u baahan tahay caawimaada fahmida ama ku hadalka Ingiriiska. Waxaad soo ka xeysan kartaa xubin qoyska ah ama saaxiib si ay kuula joogaan, laakiinse dhammaan wadhadalka ku saabsan daryeelkaaga waa in la adeegsadaa turjumaan xirfad leh. **Adeegyada turjumaanku waa bilaash waana qarsoodi.**

Xaq baad u leedahay inaad turjumaan weydiisato haddii aan mid lagu qaban. Shaqaalaha ayaa kuu ballamin doona turjumaanka.

Haddii aad dooneysid inaad isticmaashid turjumaan si aad noola soo xiriirto, fadlan ka wac Adeega Turjumaanka Taleefanka (TIS) 131 450.

#### **Local Contact (Xiriirka Degaanka)**

Person's name (Magac):

\_\_\_\_\_

Contact number (Taleefan):

\_\_\_\_\_